

Xeerka Madaxweynaha Jamhuuriyada lamba. 53 ee 3 Maarso 1968

Wax ka bedel Xeerkanidamiyaha dhismaha Wasiirka Maaliyada

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Kadib markii la arkay qod. 81 iyo faqradda 2aad ee qod. 85 ee Dastuurka;
Kadib markii la arkay qodobka 23 ee Sharciga lamba. 4 ee 3 Juun 1962 ee
Xeernidamiyaha Dowladda iyo wax ka bedelidda lagu suubiyey;

Kadib markii la arkay qod. 19 ee DPR ee 20 Maarso 1965 ee Xeernidamiyaha
Maamulka iyo hey'ad ee Wasiirka Maaliyada iyo Xafiisyada la xiriira;

Kadib markii la garowsaday baahidda in laga ag dhiso Wasaaradda Maaliyada
Waaxda Maamulka oo u xilsaaran soo saaridda qorallada maamulka ee Wasaaradda
iyo Adeegyada Dhexe;

Kadib markii la tixgeliyey aragtida Wasiirka Maaliyadda;

Kadib markii la dhegeysta soo jeedinta Golaha Wasiirka.

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

Dhismaha Waaxda Maamulka

Waxaa laga ag dhisay Wasaaradda Maaliyadda Waax Maamul oo u xil saaran
arrimaha maamulka ee Wasaaradda Maamulka oo ay ka mid yihiin xisaabaadka iyo
shaqaalaha iyo arrimaha oo aan hoos tegeen Guddonka Guud ee Qaabdhismeedka
Shaqaalaha.

Waaxda waxaay ka kooban tahay Qeybta Maamulka Xisabaadka iyo Qeybta
Shaqaalaha.

Qod. 2

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa laga bilaabo 19 Febarayo 1968 waxaana
lagu keydin doona Keydka Rasmiga ee Shuruucda iyo Xeerarka ee Jamhuriyadda
waxaana lagu soo dabici doona Faafinta Rasmiga.

Muqdisho, 3 Maarso 1968.

Abdirashiid Ali Shermarke

Rai'sul Wasaaraha

Mohamed Haji Ibrahim Egal

Wasiirka Maaliyadda

Haji Farah Omar

Waa la arkay lana diiwan geliyey – diiwaan lamba. 1 bogga 14

Muqdisho 5 Maarso 1968

Xisaabiyaha Guud

Mohamed Isse Salwe